



Maalmaha Barafka: Sida aannu u wargelinno, goorta aannu wargelinno, sida aannu go'aanka uga gaarno, iyo maalmaha saa'idka ah

Hoos u dhicii dhawaa ee heerkulku wuxuu keenay su'aalaha soo baxa jiilaalka kasta halkan Dugsiyada Dadweynaha Portland. Dadku waxay rabaan inay ogaadaan sida aannu u go'aasanno daahitaanka ama xiritaanka dugsiga, iyo sida wixii xiisado la maqnaado loo maareeyo. Waa kuwan jawaabaha su'aalo aannu sida badan maqalno:

S: Sida ayaad ugu wargelisaan qoysaska daahitaanka iyo xirnaanshaha dugsiga?

J: Qaababkayaga aasaasiga ah ee xiriirka arrimaha cimilada:

- **limeylada:** Farriimaha waxa loo diraa cinwaanka iimeylka ardayga ee koowaad ee ku yaala foomka diiwaangalinta ardayga. Xasuusnaw inaad u sheegto macluumaadkaaga xiriirka ee ugu dambeeyey shaqaalaha xafiiska dugsiga markii loo baahdo.
- **Wicitaanno taleefan:** Wicitaanno is-wada ayaa loo diraa dhammaan luuqadaha ku shaqeeya lambarrada taleefanada ee koowaad ee ku yaala foomka diiwaangalinta ardayga. Xasuusnaw inaad u sheegto macluumaadkaaga xiriirka ee ugu dambeeyey shaqaalaha xafiiska dugsiga markii loo baahdo.
- **Qoraallo taleefan:** Lambarrada taleefanada gacanta ee koowaad ee foomka diiwaangalinta ardayga ayaa lagu rukuman karaa si loo helo farriimaha taleefanka adigoo u diraya "Yes" ama "Y" 68453.
- **Websaytka:** www.pps.net
- **Twitter:** [Follow our account](#)
- **Facebook:** "Like" [our account](#)

Sidoo kale waxaannu wixii soo kordha u dirnaa dhammaan warbaahinta maxalliga ah, si looga baahin karo go'aanadayada warka TV-ga iyo raadiyooga maxalliga ah.

S: Goorma ayaad qaadataan go'aanka xiritaanka dugsiga?

J: Yoolkayaga dhacdo kasta oo cimilo waa inaannu ururinno dhammaan wixii xog ah saacaddu markay tahay 5 subaxnimo, taasi oo u saamaxaysa Kormeeraha Guud inuu go'aan ka qaato xiisadaha maalintaas saacaddu markay tahay 5:15 subaxnimo. Kadibna farriinta ayaannu soo dirnaa, marka wakhtigu yahay 5:30 subaxnimo.

S: Maxaa lagu daraa go'aanada xiritaanka iyo daahitaanka dugsiga?

PPS waxay la tashi kala samaysaa ilo fara badan cimilada iyo xaaladaha waddooyinka, sidoo kalena waxaannu urursannaa xogtayada noo gaarka ah. Shaqaalaha gaadiidka PPS waxay si shakhsi ah u eegaan waddooyinka laga bilaabo 2:30 subaxnimo. Wax badan oo hannaanka kusaabsan ka akhri [Sheekada PPS Pulse laga soo bilaabo Maarso](#).

S: Haddii dugsiyadu ay xiran yihiin, goorma ayaa maalmaha waxbarasho la soo buuxinayaa?

Kaltirsiga degmadu wuxuu leeyahay afar maalmood oo loogu talagalay wixii soo baxa ee cimilada iyo sababo kaleba ay keenaan. Midi waa Maalmaha Madaxwaynayaasha, taasi oo dhacaysa Isniinta, 17 Febraayo sanadkan. Hase yeeshee, Maalinta Madaxwaynaha si loogu isticmaalo maalin buuxineed, waa in baaq la sii jeediyo markay tahay 18 Janaayo. Haddii kale, maalintu waxay iska sii ahaanaysaa maalin fasax, iyadoo dugsiyada iyo xafiisyaduba ayna shaqaynayn.

Maalmaha kale ee buuxineed waa dhammaadka sanad dugsiyeedka, sanadkan 8, 9, iyo 10 Juunyo (maalinta loogu talagalay ee ugu dambaysa ee dugsiyada waa Jimce, 5 Juunyo). Go'aanka kusaabsan isticmaalidda maalmahan buuxineed wuxuu yimaadda caadi ahaan kadib marka ay caddaato inuu baraf caqabad innagu yahay sanad dugsiyeedka. Kal hore, tusaale ahaan, waxaannu [ku dhawaaqnay Maarso 21](#) inaannu u isticmaali doonno labada maalmood ee u horreeya labada maalmood ee barafka leh Febraayo.

Sidoo kale waxaannu u isticmaalnay maalintii ugu dambaysay ee kal hore saacadihii nagaga lumay [“Day of Action”](#) taasi oo macallimiinta gobolka oo dhan ay maalin shaqada ka maqnaadeen si ay ugu doodaan in taageero dhaqaale oo buuxda la siiyo dugsiyada dadweynaha K-12.

S: Waa maxay arrimaha lagu daro go'aaminta haddii maalin buuxineed la isticmaalayo?

Ujeeddada maalmaha buuxineed waa hubinta in ardaydu ay helaan saacadihii waxbarasho ee ka lumay iyo buuxinta [wakhtiga waxbariseed ee ugu yar ee gobolku oggol yahay](#). Degmadu waxay ka codsan kartaa gobolka ka dhaafid, laakiin mudnaantayada koowaad waa inaannu helno wakhtiga waxbariseed ee ugu badan ee aannu karno.